# manhajka

FASALADA WAXBARASHADA

DADKA WAAWEYN

## QEYBTA:

# CILMIGA BULSHADA

WASAARADDA WAXBARASHADA

xarunta waxbarashada
dadka waaweyn

# manhajka

FASALADA WAXBARASHADA

DADKA WAAWEYN

## QEYBTA:

## CILMIGA BULSHADA

PJ
2534
.A2
M36
1987
v.1

## WASAARADDA WAXBARASHADA

**xarunta waxbarashada
dadka waaweyn**

AFD3P-7

# HORDHAC

Manhajkan Cilmiga bulshadu wuxu ka kooban yahay shan qaybood oo waaweyn oo kala ah.

1. Juqraafi.
2. Taariikh.
3. Kacaan.
4. Horumarinta bulshada.
5. Dhaqaalaha dalka.
6. Aasaaska tiknolojiyada.

Fasalkastiba qaybaha manhajka waxbuu ka qadanayaa, hase yeeshe sida fasalladu ay awoodda wax akhriga ay ugu kala firoonyihiin ayaa manhajkuna ugu qaybsan yahay.

Manhajku wuxuu muujinayaa qayb kastiba inta cashar ee ay ka kooban tahay, isla markaana cashar kastaba waxyaalaha baruhu uu ardayga uga dhigayo ayaa ku hoos qoran.

Waxa barayaasha laga codsanayaa in ay la kaashadaan aqoon yahanada bulshada marka ay dhigayaan duruusta siiba, horumarinta bulshada, dhaqaalaha, aasaaska tiknolojiyada iyo taarikhda. Isla sidoo kale marka ay dhigayaan qeybaha horumarinta bulshada, dhaqaalaha iyo tiknolojiyada waa in ay u dhigaan hab aqoon is weydaarsi oo ay dood ahaan uga qeyb geliyaan ardeyda, si looga faa'iideysto waaya aragooda.

Waxa kale oo aan barayaasha ka codsaneynaa in ay si fiican u dersaan manhajka inta aanay wax dhigista bilaabin.

Waad Mahadsantihiin.

J/le Ibraahim Xaaji Barre
Madaxda X.W.D.W.

# JUQRAAFI

## FASALKA KOOWAAD

## CILMIGA BULSHADA IYO HORUMARINTA BEESHA

### Casharka Arar

I. Juqraafi - qeexid
II. Barashada juqraafiga
III. Ujeedooyinka laga leeyahay barashada juqraafiga
IV. Faa'iidooyinka iyo waxtarka barashada juqraafiga

### Casharka 1. Soomaliya

B. Bedka dhulka - inta mayl isu soo wareeg
T. Tirada dadka deggan
J. Meesha ay dunida kaga taal - geeska Afrika
X. Sohdimaha iyo dalalka jaarka la ah
KH. Magaalo madaxda
D. Gobollada, degmooyinka iyo tuulooyinka

### Casharka 2. Qaabka dhulka

B. Dhulka buuralayda ah
T. Dhulka banaanka ah
J. Dhulka taagagga ah
X. Dhulka togogga ah

### Casharka 3. Biyaha

B. Webiyada - Meesha ay ka soo burqadaan iyo meesha ay ku dhammaadaan
 - Gobollada iyo degmooyinka Jubba maro
 - Gobollada iyo degmooyinka shabeeli maro
 - Waxtarka webiyada xagga beeraha
T. Togagga
J. Durdurada
X. Ceelasha
KH. Isticmaalka biyo celinta - marka biyaha la celiyo
 - sababta biyaha loo celiyo
 sida loo celiyo.

## Casharka 4. Xebta iyo kalluunka

B. Dhererka - toosnaanta
T. Kalluunka laga dabto xeebaha
- noocyada kalluunka
- Qalabka kallunmaysiga
- Qallajinta iyo milxaynta kalluunka
- Qaboojinta iyo raridda kalluunka

J. Kallumaystada - iskaashatooyinka
X. Suuqaynta kallunka
KH. Kaalinta kalluunka xagga dhaqaalaha dalka.

## Casharka 5. Isgaarsiinta iyo gaadiidka

B. Jidadka dheerdheer iyo degmooyinka ay isku xidhaan
T. Jidadka laamiga ah
J. Waxtarka jidadka
X. Boosta iyo qalab war - isgaadhsiinta
-Telegiramyada; telefoonada
KH. Gaadiidka dhulka
D. Gaadiidka cirka
R. Gaadiidka Badda

## Casharka 6. Cimilada iyo Xilliyada

B. Cimilada joogta ah, amase, sannadka intiisa badan
T. Cimilada gooreed - gobolada iyo degmooyinka aad u kulul: Luuq, Doolow, Buulo Xaawo, Boosaaso iwm.
J. Xilliyada - Gu' Maarso ilaa Maayo
- Jiilaal Junn ilaa Ogosto
- Dayr Sibtambar ilaa Nofembar
- Diraac Diisambar ilaa Febraayo

X. Dabaylaha: Dabaylaha ka dhaca badda
Dabaylaha masuun
KH. Roobka - Inta qiyaas sannadka gudihiisa dhulka ku da'da
- Meelaha roobka badan
- Meelaha roobka dayreed yaryahay
- Xayska ka da'a xeebaha

Casharka 7. Filiqsanaanta Baadka

B. Dhul cowseedka
T. Dhulka kaymaha ah
J. Dhulka gubanka ah
X. Dhulka geed gaabka ah

Casharka 8. Filiqsanaanta xoolaha

B. Tirada guud ee xoolaha nool - dabjoogta iyo duurjoogta
T. Gobolada xoolo dhaqida ku habboon
J. Gobollada, iyo degmooyinka geel, - lo'da amase ariga dhaqasho u badan
X. Meelaha, geel; lo'amase, ari dhaqashada ku habboon

Casharka 9. Xoolaha iyo nolosha dadka

B. Nacfiga xoolaha: caanaha; hilibka; subagga; hargaha iwm.
T. Sida habboon ee xoolaha hargaha loogala baxo
J. Habaynta, qallajinta, milixaynta iyo magdaynta hargaha
X. Habaynta iyo Warshadaynta nafciga xoolaha
- Warshadda hilibka - Kismaayo
- Warshadda caanaha - Xamar
- Warshadda kabaha - Xamar

KH. Waxyaabaha laga sameeyo saamaha xoolaha
- Suumanka, Boorsooyinka, kabaha iwm.

Casharka 10. suuqaynta xoolaha nool

B. Calfinta
T. Waraabinta
J. Daawaynta
X. Suuqaynta xoolaha nool nacfigooda, marka ku habboon
KH. Xoolaha la dhoofiyo - dalalka loo dhoofiyo - lacagta cad ee naga soo gasha
D. - Daryeelidda xoolaha dibedda jooga
- Dalxiis badan oo dalka yimaada
- Soo gal dhaqaale.

# FASALKA KOWAAD

## TAARIIKH

### Casharka 1. Taariikhdii hore ee Soomaaliya

B. Dhaqanka iyo caadooyinka
- Waxyaabaha ay qaban jireen - xoolo dhaqato
- Waxyaabaha ay cuni jireen - huwan jireen

T. Magacyada loo yiqiin dhulka Soomaaliya
- Dhulka Bunt
- Dhulkii udgoonka
- Dhulkii Beeyada
- Dhulki barbaariyiinta
- Dhulkii geeska Afrika

### Casharka 2. Xidhiidhkii/Soomaaliya la lahayd dalalka kale

B. Masaaridii hore
- Waxyaabaha masaaridu ka qaadan jirtay dhulka Soomaliya
- Waxyaabaha Masaaridu u keeni jirtay Soomaalida

T. Dalalka kale ee carbeed - Beershiyiinta - Xiriir ganacsi

J. Masaarida iyo carabta kale waxyaabaha ay ku soo kordhiyeen nolosha Soomaalida
- Ilbaxnimo

X. Xidhiidhka Shiinaha iyo Soomaalidii hore
- Waxyaabaha noo caddeynaya inuu xiriirkaasi jiray
- Magaalooyinkii Shiinuhu yimaadeen
- Waxyaabaha ay Soomaalida isdhaafsan jireen

### Casharka 3. Sahmiskii iyo degitaankii Xeebaha Soomaaliyeeed

B. Sahmiyayaashii yimid dhulka Soomaliya
- Xeebaha ay sahmiyeen
- Waxyaabaha ay la kulmeen
- Faaladdi ay ka bixiyeen dhulka

T. Xeebaha Soomaaliyeed ee carabtu degeen
- Xeebaha Benaadir -Xamar, Marka
- Magaalada Saylac, Berbera

J. Siday Soomaalidu iyo carabtu u wada dhaqmi jireen
- Isdhexgalkii
- Dhaqan isweydaarsigii

Cutubka 4. Dalka Soomaaliya kala qeybintii gumaysiga ka hor

B. Noloshii dadka
   - Dhaqankii iyo caadooyinka
T. Habka iyo maamulkii
   - Suldaamadii
   - Boqoradii:
   - Xeerarkii

Casharka 5. Soo gelitaankii gumaysiga dalka Soomaaliya

B. Taariikdii gumaystayaasha reer Yurub soo galeen
   - Qarnigii 19aad
   - Meelaha ay ka soo galeen
   - Siday u soo galeen
T. Waxyaabaha uu doonayey gumaystuhu
   - Dhul ballaadhsi
   - Alaabta warshadahoodu u baahanaayeen
   - Xoog uga shaqeeya dhulka iyo Warshadaha
J. Khayraadka gumaysiga ka guran jirey dhulka Soomaalida
   - Alaabta cayriin
X. Siduu dadka Soomaaliyeed uga hortagay gumaysiga
   - Waddanimadii dadka Soòmaaliyeed
   - Dagaaladii gumaysiga ku qaadeen
   - Waxyaabaha ay markasta ku dhawaaqayeen oo doonayeen

Casharka 6. Kala boobka iyo sohdimihii dhulka Soomaaliyeed

B. Qabashadii guud ahaaneed ee dalka Soomaaliya
   - Kala qaybsashadii gumaystayaasha gobollada
   - Gobolka Koonfur - Talyaaniga iyo maamulkii
   - Gobolka Waqooyi - Ingiriiska iyo maamulkii
J. Gobollada NFD iyo Soomaalida galbeed
   - Sidii gobolka Soomaali NFD loogu wareejiyey Kenya
   - Sidii gobolka galbeed loogu wareejiyey Xabashada
X. Jabuuti
   - Siduu Faransiisku u qabsaday
   - Maamulkii xumaa iyo cadaadiska
   - Halganka dadka Soomaaliyeed ee Jabuuti

# K A C A A N

## FASALKA KOOWAAD.

### 1. Kacaankii 21kii Oktoobar 1969

B. Ballan qaadka Kacaanka:
Gaarsiinta dalka heer sare iyo horumar
Gaarsiinta dadweynaha barwaaqo iyo baraare.
T. Himilooyinkii Kacaanka:
Tirtiridda waxyaabihii foosha xumaa ee dalka jiray Kacaanka ka hor.
Daryeelidda danta guud ee dadweynaha Soomaaliyeed.
J. Warqadda Koowaad.
Qodobada siyaasadda gudaha;
Qodobada siyaasadda dibadda.
X. Warqadda 2aad.
Doorashadii mabda'a Hantiwadaagga Cilmiga:
Isbedelka la dhashay mabda'a Hawl iyo Hantiwadaag.

### 2. Iska Wax u qabso

B. Macnaha iska wax u qabso.
Mabda'a dhaxalgalka ah.
Is-aaminsanaan dadka.
Isku kalsooni awood iyo karti.
Isku tashi Ummadnimo.
T. Tiirarka Iska Wax u Qabso.
- Iskaga tashi meel kasta
- Isdir iyo isxilqaan.
J. Hantiwadaagga iyo iska wax u qabso.
- Isku asal iyo isku farac.
- Gobonnimo iyo madaxbanaani.
X. Hawlaha Soomaaliya iska wax u qabso lagu fuliyey.
- Dhismaha Dugsiyada.
- Dhismaha Jidadka.
- Bucaadcelinta.
- Nadaafadda Magaalooyinka.

### 3. Ciidaha Soomaaliya

B. Ciidaha Waddaniga ah.
- Ciidda Calanka Soomaaliyeed ee 12 Oktoobar 1969.

- Ciidda 26 Juun
- Ciidda 1da Luulyo
- Ciidda 21ka Oktoobar

T. Ciidda bulshada Xoogsatada
- Ciidda shaqaala ee 1da May.

J. Ciidaha Diiniga.
- Ciidda Mawliidka ee 12 Rabiic al-Awal.
- Ciidda Soonfureed.
- Ciidda Carafo.

X. Ciidda 1da Luulyo.
- Madaxbannaanida Gobolka Koonfur
- Israaci Gobollada Woqooyi iyo Konfur.
- Aasaaskii X.H.K.S.

## 4. Guulihii waa weynaa ee Kacaanka 21ka Oktoobar

1. Qaadashada Mabda'a Hawl iyo Hanti-wadaag
2. Ololihii Horumarinta Reer Miyiga
3. Toleynta halbowlayaasha Dhaqaalaha
4. Qoraalkii Farta Soomaaliya iyo Hirgelinteedii

## 5. Xisbiga hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed

B. <u>Aasaaskii Xisbiga</u>
- Shir weynihi aasaaska Xisbiga
- Taariikhda iyo goorta la aasaasay

T. Doorashadi Guddiga dhexe
- Guddiga Siyaasadda
- Guddiga Kormeerka

J. Doorashadii Jaalle Siyaad
- Xoghayaha Guud ee Xisbiga
- Madaxweynaha J.D.S.

X. Calaamada Xisbiga iyo waxyaabaha ay tilmaamayso
- Yaambo iyo burris
- Shaqo iyo Xoogsato

KH. Sababihii dhaliyey dhismihii xisbiga
- biseylka garaadka siyaasiga ah ee dadweynaha
- ka qaybgelinta dadweynaha maamulka dalka

# HORUMARINTA BULSHADA

## DHISMAHA BULSHADA

## FASALKA 1aad

B. Waxyaabaha aan looga maarmin bulshada "kuwa yarar" sida tuulooyinka iyo xaafadaha

Hoggaan: waxa xil ka saaran yahay ururinta, guddoominta, maamulka, iyo daryeelka nolosha iyo amuuraha saameeya bulshada.

Waxyaabaha aan looga maarmin bulshada "ballaadhan" sida degmooyinka iyo magaalooyinka

Bulshooyinka ballaadhan waxa looga baahan yahay dad aad ugu xeel dheer hawalaha kala geddisan sida:
- maamulka, siyaasadda iyo guddiyada tuulada
- kor u qaadidda waxbarashada, daryeelka caafimaadka, gaadiidka iyo isagaarsiinta iyo hawlaha la xidhiidha dhaqaalaha.

T. Iskudubaridka laysku dubarido mashaariicda lagu horumarinayo bulshada.

In la ogaado baahida bulshado u qabto:
- Nafaqada
- Hoyga
- Caafimaadka dadka iyo xoolaha
- Waxbarashada
- Gaadiidka, nolosha bulshada iyo wax alla wixii kala ee ka maqan bulshada.

# QOFKA IYO BULSHADA

## FASALKA 1aad

Qayb: Wada noolaanshaha guud ahaaneed.
La noolaanshada qoyska
La noolaanshada bulshada
La noolaanshada Ummadda

Qaybta 1 - Nolosha Bulshada

Waxyaabaha ay wadaagaan qoyska iyo bulshadu.
Qoyska oo bixiya:
- lacag: canshuurta
- socodsiinta shaqada shaqaalaha bulshada
- Ka doodida iyo xalilkeeda maashaakilka bulshada.

Bulshadu waa in ay la timaado waxyaalahan soo socda:
- Shaqaalaha ummadda (caafimaadka, tacliinta & dhaqanka)
- Nabadgelyada (Booliska)
- Gaadiidka (waddooyinka & baabuurta)
- Keenitaan shaqo iyo wax soo saar badan

2. Qaabka bulshada

- intii isku da'da (fac ah)
- dadka waaweyn iyo carruurtu waa in ay is garabsadaan
- Ragga & haweenka oo is garabsada
- Bulshada shaqo wada haysa oo is garabsata.

3. Masuuliyadaha bulshada

- Madaxda
- Abaabulayaasha iyo maamulayaasha
- Kuwa wax soo saara
- Kuwa haya shaqada caadiga ah (caafimaadka & tacliinta)

Qaybta 2:

1. Wada noolaanshada

Wada noolaanshuhu wuxu waxyeelaa kali noolaanshanimada.
Ka falanqoodka waxyaabaha anfacaya bulshada.
Ixtiraanka iyo dhawrista nolosha & badbaadada kuwa kale
Daryeelidda danaha shaqaalaha taagta daran sida:carruurta &
Haweenka

## DHAQAALAHA DALKA

Cutubka: Dhaqaalaha
Xubnaha: 1. Qofka iyo dhaqaalaha dalka.
2. Qeybaha muhimka ah ee aynu dhoofino.
3. Dhaqaalaha qarameed.
4. Suug geynta.
5. Gaadiidka iyo dhaqaalaha.
6. Iskaashatooyinka.

## FASALKA KOOWAAD

1. Qofka iyo dhaqaalaha guud.
   Qofkastaba oo ka mid ah bulshada kaalin weyn aynu kaga jiraa dhaqaalaha guud.
   - Wax kala geddiska.
   - Wax kala iibsiga.

   Cashuuruha dawladda oo uu bixiyo (isaga oo iibsada waxyaalaha dalka laga soo saaro).
   Siyaalaha ay dib ugu soo noqdaan oo uu uga faa'iideysto cashuurihii uu bixiyey (dugsiyo loogu dhiso, jidad, golayaal hannuunin).

2.B. Waxyaalaha muhumka ah ee aan debedda u dhoofino ee lacagta culisi inaga soo gasho.
   Mooska.
   Xoolaha.
   Kallunka.
   Sida dhaqaalaha inaga soo gala waxyaalahaas ay u saameeyaan qofka.
   - Shaqo lagu qoro.
   - Waxyaalaha iyo cuntooyinka aan dalka laga helin oo debedda lagaga soo iibsado.

T. Soo saaridda mooska.
   - Noocyada kala geddisan ee mooska.
   - Noocyada ku habboon ganacsiga debedda.
   - Tartanka suuqa debedda.

3. Dhaqaalaha qarameed.

B. Hababka dhaqaaleed ee ummaddu ku xoogsato.
- Beeraha.
- Xoolo dhaqasho.
- Warshado.
- Kallumeeysi.
- Shaqaale dawladeed.

T. Kala tilmaamidda sida dhulku ugu kale habboon yahay.
- Beeraha.
- Xoola dhaqashada.
- Kallumeeysiga.

4. Suug geynta.

B. Suug geyta dalka gudihiisa.
- Waxyaalehee ayaa ku wanaagsan ganacsiga guddaha.
- Xoolaha.
- Waxyaalaha beeraha ka baxa.
- Qalabka farsameysan.

5. Dhaqaalaha iyo gaadidka.

B. Gaadidka iyo jidadku kaalin weyn ayey kaga jiraan horumarinta dalka.
- Waxay kordhiyaan oo ay isu furaan ganacsiga magaalada iyo miyiga.
- Balaadhinta iyo badinta suugyada iyo sayladaha.

T. Suura gelinta alaabta oo gaadha sayladaha debedda iyaga oo aan xumaan.
- Waa in gaadiidku noqdo mid dhaqso badan.
Mid aan joogsan xilliyada gaarkood sida roobabowga.

6. Iskaashatooyinka

B. Waa maxay iskaashatadu
- Sidee ayey u shaqeeysaa iskaashatadu
- Dooro mid ka mid ah iskaashatooyinka gobalka ka dhisan oo sharax.
- Faa'iidooyinkaa ay iskaashatadu leedahay iyo dhibaatooyinka keli lahaanshaha.

# AASAASKA TIKNOLOJIYADA

## FASALKA 1aad

Xubno: Alaabta soo saarka tiknoolajiyada (wax soo saarka dadweynaha ayaa ka door bidan kan qof-qofka).

Xubin: 1. Wax soo saarka dadweynaha ayaa ka door bidanta ka qof-qofka.
Alaabta sida caadiga ah loo isticmaalo sida dharka, caaga, warqadaha iwm.
Is barbardhigga ama isu eega alaabta dhaqanka iyo alaabta casriga ah.
2. Astaamaha alaabta tiknikada.
Caaga, qaraarada, biraha kala duwan iyo mid waliba waxuu ku habboon yahay.
Habboonyahay.

Xubin: 2 Sida alaabta looga dhigo mid raagta

1. Hababka uu qof waliba isticmaali karo iyo xirfadda warshadaynta.
Megdinta hargaha
   - xaydh ku subkinta hargaha
   - Caag ku shaqlinta hargaha
   - Rinjiyeynta joogtada ah ee hargaha
   - Xaydhaynta.
2. Hababka farsamada looxa looga dhigo mid raagta:
   - Qalaji intaanad isticmaalin
   - Sulxinta geesaha si aanu u kala jabin
   - Intii suura gal ah oo la isticmaalo bir aan badnayn si aanay u daxalaysan ama isticmaal birta ku habboon.
   - Dusha oo laga rinjiyeeyo si dayac looga ilaaliyo loona sulxiyo.
   - Ku isticmaalka looxa alaab kimika ah oo lagu ilaaliyo.
3. Hababka farsamada birta looga dhigo mid raagta (qeybta labaad)
   - Ka fogaynta birta meel qoyan ama meelaha sayaxa leh. Haddii aan saxaya la joojin karin, ku isticmaal ama ku samee birta wax daxalka ka ilaaliya sida rinjiyeyn joogta ah ama dusha oo laga xaydheeyo.
   - Xaydhaynta iyo dhaqdhaqaajinta masaamiirta wareegta

## Sida alaabta dib loogu hagaajiyo

1. Baahida loo qabo cusboonaysiinta alaabta waxay tahay ka hor tegidda waxyeelada oo korodha.
   Siyaabaha kala geddisan ee wax loo cusboonaysiiyo.

Dharka: tolid iyo karid
Looxa: musmaaro iyo xabag
Birta: Alxan
Rabadhka: xabag; kul iyo qabow.

2. Cusboonaysiinta dharka: qalabka iyo habka
3. Cusboonaysiinta farsamada looxa qalabkaiyo habka
4. Cusboonaysiinta farsamada birta qalabka iyo habka
5. Cusboonaysiinta rabadhka iyo caaga: qalabka iyo habka.

# JUQRAAFI

## FASALKA LABAAD

### Casharka 1. Dadka Soomaaliyeed

B. Filiqsanaanta dadka
T. Meelaha dadku ku badan yahay
J. Hawlaha iyo meheradda kala geddisan ee dadka
   - Xoolo dhaqato, beeralay, kalluumaysato, reer magaal iwm.
X. Iskaashiga, **isbahaysiga** iyo wax wada qabsiga dadka

### Casharka 2. Dhaqaalaha dalka Soomaaliyeed

B. Kaalinta xoolaha nool
T. Kaalinta beeraha - Muuska
J. Kaalinta warshadaha
X. Kaalinta Kalluunka
KH. Kobcinta dhaqaalha: iskaashatooyin iyo tacab kordhin
D. Waxyaabaha dalku dibedda u dhoofiyo
R. Waxyaabaha dalku dibedda ka keeno
S. Dheelitirka waxyaabaha dibedda ka yimaada iyo waxyaabaha uu dibedda u diro.

### Casharka 3. Beeraha

B. Qodaal
T. Qodaal joog
J. Wareega beerida miraha iyo carrada ku habboon
X. Beertiaanka miraha ku habboon; amase, ku baxa xilli gaaban Sida gallayda, masagada iwm.
KH. Xulashada abuurka iyo nafaqada carrada
D. Waraabinta beeraha
R. Kordhinta iyo soo saaridda tacabka beeraha
S. Ka hortagga cayayaanka waxyeeleeya miraha
SH. Habaynta iyo **warshadeynta** miraha beeraha

### Casharka 4. Afrika

B. Baaxadda iyo muuqaalka qaaradda Afrika
T. Dalalka gobta ah iyo magaalo madaxyadooda
J. Webiyaha iyo harooyinka
X. Xoolaha iyo baadka
KH. Gaadiidka iyo isgaarsiinta

## FASALKA 3AAD

### TAARIIKH

**Casharka 1. Axmed Guray**

B. Noloshiisii
- Meeshii uu ku dhashay. Harar
- Taariikhduu dhashay - Qarniguu noolaa

T. Boqortooyadiisii - Awdal
- Galbeedka Soomaaliya
- Xeebaha Waqooyi Soomaaliya

J. Sannad yaduu xukunka hayey
- Kor u qaadka diinta islaamka
- Difaaca diinta islaamka
- Dhisidda dawlad islaam ah ee gobolka koonfur-bari Itoobiya

X. La dagaalankii Itoobiya
- Guulihii muslimiinta
- Dhulkii laga qabsaday Itoobiya

**Casharka 2. Dhaqdhaqaaqyadii gobanima doonka Soomaaliyeed**

B. Soo gelitaankii gumaystayaasha
- Ka hortaggii gumaysiga
- Dagaaladii iyo diidmadii gumaysiga

T. Dhiiranaantii dadka Soomaaliyeed & waxyaabaha caddaynaya
- Buuggaagtii reer Yurub qoreen
- Waxyaabaha ay ku tilmaameen dadka Soomaaliyeed

J. Siduu u socday halganku iyo dhaqdhaqaaqyadu
- Dagaallo iyo halgan joogta ah
- Maamul xasiloon la'aantii gumaysiga

X. Tabihii iyo hubkii gumaysiga
- Ku dagaalan hub culus
- Baabiinta midnimada dadka
- Baabiinta isku kalsoonida dadka
- Oggoleysiinta dadka Soomaaliyeed gumaysiga

KH. Hubkii Soomaalidu ku dagaalami jirtay & guulahay dhaliyeen
- Seef, warmo, billaawe, dhagaxaan iwm
- Ka lib helidii ciidamada gumaysiga
- Dilkii qaar ka mid ah ciidamada gumaysiga

D. Hoggaamiyayaashii dhaqdhaqaayadii gobanimodoonka
- Sayid
- Fawrax Oomaar
- Sheekh Bursane
- Sheekh Bashiir

## Casharka 3. Dagaalkii gobanimo doonka Sayid Maxamed

B. Noloshiisii yaraantii iyo siduu ku soo barbaaray
- Meesha iyo taariikhda uu dhashay
- Quraanka barashadiisii iyo faafinta diinta islaamka

T. Socdaaladii iyo ku soo noqodkii Berbera
- Meeluhuu socdaalka ku tagay - Xajka
- Culumadii uu la kulmay
- Ka soo degiddii Berbera iyo bilaabiddii wacdiga

J. Dugsi baaderiyaasha
- Carruurtii Soomaaliyeed ee la kiristiyaamiyey
- Sayidku siduu uga xumadday

X. Ingiriiska iyo Itoobiya (heshiisyada)
- Heshiiskii la wada dagaalanka darawiishta
- Dagaalkii Cagaarweyne
- Guuldarridii ku dhacday gumaystayaasha - dilkii Koofil

KH. Heshiisyada Sayidka iyo Ingiriiska
- Dhulkii loo aqoonsaday Sayidka - Boqortooyadii Bari ilaa tan Hobyo
- Awoodii iyo kelitashigii la siiyey sayidka

D. Duullaankii Ingiriiska
- Ciidamadii ku soo duulay daraawishta: xagga cirka, dhu'ka iyo xagga baddaba
- Bombkii Taleex lala dhacay

R. Ujeeddooyinkii kacaanki Sayidka
- Xoraynta dalka Soomaaliyeed
- Isugaynta dhulka Soomaaliyeed
- Kor u qaadida diinta islaamka

## Casharka 4. Ururadii Siyaasadeed ee gobanimo doonka Soomaaliyeed

B. Bilowgii dhaqdhaqaaqyada adduunweynaha & sababihii dhaliyey
- Kacaankii Ruushka ee 1917
- Jabkii ciidamada Fashiistaha
- Dhalashadii ururro waaweyn ee caalami ah: UQM

T. Ciidamada Soomaaliyeed ee ka qaybqalay dagaalkii 2aad ee Dunida
- Waxyaabaha iyo fikradda ay soo kordhiyeen

J. Ururkii SYL ee gobolka Koonfur
- Taariikh iyo meesha laga asaasay
- Dhalanyarada asaastay
- Halgankuu soo maray

X. Ururkii SNL ee gobolka Waqooyi
- Asaasiddiisii hore
- Magac roggiisii
- Waxyaabaha uu Umadda ku booriyey

KH. Ujeeddooyinka guud iyo halgankii labada xisbi
- Xoreynta Soomaaliya
- Israacidda Gobollada Soomaaliyeed
- Kor u qaadidda nolosha Ummadda

Casharka 5. Maamulkii gumaysiga Talyaaniga; Ingiriiska iyo Faransiiska

B. Soo qanaamkii gumaystayaasha reer Yurub qarnigii 1caad
- Ujeeddooyinkii immaatinkooda qaaradda Afrika
- Qaadashadii khayraadka dalalka Afrika

T. Gumaystayashii ku soo qammaamay dalka Soomaaliya
- Ingiriiska, Talyaaniga iyo Faransiiska
- Dhibihii ay la kulmeen si ay maamul uga dhisi_lahayeen dalka

J. Tabihii gumaystayaashu iyo waxyaabahay ku kaceen
- Dil; xarig ; musaafiris
- Laaluush; kala qaybinta dadweynaha
- Baabiinta dhaqanka Soomaaliyeed
- Wax qabad la'aanta dhinac kasta

Casharka 6. Madaxbanaanidii iyo israacii gobollada Koonfur iyo Waqooyi

B. Halgankii dadweynaha Soomaaliyeed
- Axsaabtii soo halgantay - SYL, SNL iwm
- Barnaamijyadii iyo axsaabta iyo urarada bulshada

T. Doodihii iyo dacwooyinkii Golaha UQM
- Gumaystayaashu waxay ku doodayeen
- Ergadii Soomaaliyeed waxyaabaha ay ku dawiday

J. Go'aanadii UAM
- Dawladii daakhiliga ahayd

X. Madaxbanaanaidii iyo gobanimo qaadashadii
- Madaxbaanaanidii gobolka waqooyi - 26 Juun 1960kii
- Madaxbanaanidii gobolka Koonfur - 1dii Julaay 1960kii
- Israacii labado gobol - Jamhuuriyadda Soomaaliyeed

## Casharka 7. Maamulkii dawladihii shicbiga ahaa ee 9kii sano ka dambeeyey xorriyadda

B. Siday u dhisantay Jamhuuriyadda Soomaaliyeed
- Golihii Barlamanka ugu horreeyey
- Axsaabtii dawladdii ugu horraysay ka dhisantay

T. Distoorkii iyo xeerarkii
- Sidii loo dhaqan gelin jiray

J. Soo dhexgalkii gumaystayaasha arrimaha Soomaaliyeed
- Dabadhilifyadii ay ku gambadeen
- Danaha iyo ujeeddada ay lahaayeen

X. Tafaraaruqii Ummadda iyo axsaabtii faraha badnayd

KH. Doorashadii 1964
- Habka iyo sidii wax loo doortay
- Maamulkii dawladda dhisantay

D. Doorashadii 1969kii
- Kala tagiddii iyo cadowtinimadii dadweynaha dhexdooda
- Axsaabtii doorashey ka qeybgashay
- Heerkii jiritaanka iyo midnimada Soomaaliyeed gaadheen

## Casharka 8. Kacaankii 21ka Oktoober 1969

B. Sababihii dhaliyey kacaanka
- Caddaaladarridii
- eexashadii
- Maamulxumadii
- iwm.

T. Ujeeddooyinkii kacaanka
- Warqadii Kowaad.
- Warqadii Labaad

J. Kacaankii 21ka Oktoober 1969 bogga uu kaga jiro taariikhda Ummadda Soomaaliyeed
- Wuxu kacaanadii hore kaga duwan yahay
- Siduu u daryeelay amase, u saameeyey nolosha bulshada Soomaliyeed
- Siduu u badbaadiyey qarannimada

## Casharka 9. Horumarka iyo Guulaha uu soo hooyey Kacaankii Oktoober

B. Horumarka xagga siyaasadda
- Siyaasadda gudaha
- Siyaasadda dibedda
- Dhismaha xisbiga Hantiwadaaga kacaanka Soomaaliyeed

T. Horumarka xagga dhaqaalaha
- Toleyntii meelihii dadka ajinabigu haysay
- Habaynta ashcaarka

J. Horumar ka xagga waxbarashada
- Dhismaha dugsiyada Hoose/Dhexe/Sare
- Jaamicadda Ummadda - Kulliyadda
- Baahinta waxbarsha - OHRM
- Tababaridda shaqaalaha

X. Horumarka xagga Caafimaadka
- Daryeelidda caafimaadka dadweynaha
- Kordhinta dhismaha Cusbitaalada iyo tababaridda shaqaalaha caafimaadka

Casharka 10. Xidhiidhka Soomaaliya la leedahay dalalka Afrikaanka ah ee jaarka yihiin iyo is afgaranwaaga ka taagan dhulalka laga haysto Soomaaliya

B. Cidda abuurtay is-afgaranwaaga
- Gumaystayaashii reer Yurub
- Soohdimihii beenta ahaa

T. Ujeeddooyinkuu gumaystuhu ka lahaa
- Ka dhex abuuridda isafgaran waa dalalka Afrikaanka ah
- Isutag la'aan iyo dagaallo dhexmara dalalka dalalka walaalaha ah

J. Siyaasadda Dawladda Soomaaliyeed
- Ka dhammaystirrida arrimaha dexyaal ayaga dawladaha si nabadgelyo ah iyo walaaltinimo ah

Casharka 11. Xidhiidhka Soomaaliya la leedahay adduunweynaha, gaar ahaan, dalalka dunida saddexaad iyo dalalka hantiwadaagga ah

B. Dhaqanka dadka Soomaaliyeed
- Nabadgelyo jeclidda
- Isbahaysiga iyo sinnaan jeclidda

T. Xidhiidhka dheer ee Soomaaliya la lahaan jirtay dadyowga adduunka ee hore
- Masaaridii hore
- Shiinaha
- Dalal kale ee carbeed

J. Soomaaliya dalalka maanta xiriir wacan la leedahay
- Dalalka ku jira Ururka Dalalka Dunida Saddexaad
- Dalalka Muslimiinta ah

- Dalalka horusocodka-dalalka hantiwadaagga
- Dhaqdhaqaaqyada gobanima doonka ah

X. Xiriiradu waxay yihiin
- Ganacsi
- Isbahaysi
- Wax wadaqabsi
- Faro gelin la'aan arrimaha gudaha ee gaar ahaaneed

# K A C A A N

## FASALKA LABAAD.

### 1. Ururada Ijtimaaciga ah ee Soomaliyeed

B. Mujtamaca soomaliyeed kacaanka ka hor.
Kala daadsanaantii mujtamaca
Xiriir la'aantii
Ujeedooyinki asxaabta, ururada, jimciyadaha
T. Mujtamaca soomaliyeed siduu u kala qaybsana
Asxaabo - 78
Ururo - Ardo, dhallinyaro, haween, shaqaale
Jimciyado saaxibtinimo.
J. Mujtamaca soomaliyeed wixii ka dambeeyey kacaanki 21ka Oktoobar.
Dib u habeynta mujtamaca soomaliyeed
Xafiiskii xiriirka dadweeynaha iyo ujeedooyinkii loo furay.
X. Ururada ijtimaciga ah iyo ujeedooyinka loo asaasay ururada.
Mideynta fikrada dadka soomaliyeed.
Kordhinta garaashada dadweynaha.
Mideynta iyo isugeynta xooga dadweynaha.
Ka qayb qaadashada dadweynaha maamulka dalka.
KH. Qeybaha ururada
- Ururada shaqaalaha soomaliyeed iyo ujeedooyinka laga leeyahay.
- Ururada ardada soomaliyeed (barbaarta Oktoobar) iyo ujeedooyinkiisa.
- Ururka ubaxa Kacaanka Oktoobar iyo ujeedooyinkiisa.
- Ururka Haweenka Soomaliyeed.

### 2. Hantiwadaaga Cilmiga ah

B. Mabaadida guud ee Hantiwadaga:
ka soo horjeedka habka hantigoosadka
baabi'inta isku dhul-noolaashaha
sinnaanta iyo caddaalada bulshada
T. Habka Hantiwadaaga: daryeelka bulshada
Xagga waxbarashada
Xagga caafimaadka

. Sababihii Soomaliya u doortay Hantiwadaaga
In la gaaro sinnaan bulshada dhexdooda
In la gaaro caddaalad bulshada dhexdooda
In la gaaro horumar dhaqso ah.

. Xeerarka hantiwadaagga
Xukunka dadweeynaha
Iskaashi shaqaale iyo urur iwm.

## . Kacaanka Aqoonta iyo Hiddaha

. Waxa looga jeedo Kacaanka dhaqanka iyo hiddaha
Baabi'inta dhaqanka xun
Ciribtirka caadooyinka runta aheyn.

. Dhaqanka iyo caadooyinka xun
Sheegashada qabiilka
Mingiska, booranaha, wadaadaha, faalka.

. Hirgelinta kacaanka aqoonta iyo dhaqanka
Hirgelinta qorista af soomaaliya
Hannuuninta dadweeynaha.

## . Sinnaanta Ragga iyo Dumarka

. Halgankii dumarka soomaliyeed.
Kaalintii haweenku ka qateen dagaladii gobanimada

. Kaalinta maanta haweenku kaga jira dhismaha iyo horumarinta dalka
Xilkasnimada haweenka
Firfircoonida haweenka

. Aqoonsashada xuquuqda dumarka 8dii Maarso 1910
Isku mid ahaanti ragga iyo dumarka
Isku waxtar ahaanta ragga iyo dumarka
Isku aragti ahaanta ragga iyo dumarka

. Ku dhawaaqii G.S.K. sinnaanta ragga iyo dumarka 11 Jennayo 1975.
Xagga shaqada
Xagga waxbarashada.

## . Xisbiga hanti-wadaaga Kacaanka Soomaaliyeed

. Shuruudaha ku biiridda Xisbiga

. Distoorka (Guud ahaan) Xisbiga Hantiwadaaga Kacaanka Sommaliyeed

. Xisbiga iyo Ururada-Ijtimaaciga ah
- Ururka Shaqaalaha
- Ururka Ardayda
- Ururka Haweenka
- Ururka Dhalinyarada

# HORUMARINTA BULSHADA

## FASALKA IIaad

### B. Iskaashiga ka dhexeeya tuulada ama xaafadda

1. Waa in uu ku dhisanyahay qorsha la isla gaarto.
2. Waa in laga digtoonaada iska hor imaad
3. Waa in uu ahaado mid danta tuulada lagu habeeyey

### T. Habka lagu ogaan karo baahidda bulshada

- Aqoon isweydaarsi dhexmara ururada ay ka mid yihiin:
- Golayaasha hanuuninta
- Ururada dhallinyarada
- Fasalda waxbarashada dadka waaweyn
- Ururada ciyaartoyda iyo ururada kale ee gaareed sida ganacsatada, beeralayda, shaqaalaha iwm.

# QOFKA IYO BULSHADA

## FASALKA LABAAD

Qaybta 3:

1. Nolosha qoyska

Xaaska oo ah aasaaska bulshada.

Shaqada qoyska

- barbaarinta carruurta
- ku abuuridda carruurta nolosha bulshada
- u habaynta wax ay u baahanyihiin (cuntada & jiifka)
- Isu imaatinka bulshada (is dareensiinta masuuliyada, nabadgalayda iwm).
- tusaalooyin ku saabsan nolosha maalin kasta iyo sidii dhibaatooyinkeeda looga hortagi lahaa.

2. Hagaajinta qoyska

- nolosha qoyska
- iskaga filaanshaha dhaqaalaha
- daryeelka caafimaadka hooyada.

# DHAQAALAHA DALKA

## FASALKA LABAAD

1. Siyaalaha wax soo saaridda qofku ay u kale geddisan tahay.

B. Qof soosaara inta baahidisa dabooleysa oo gudh ah.
Qaar baahidooda daboola isla markaana soo saara dheeraad uu waxyaalo kale ku gatto.
Wax soo saarid ganacsi oo aan cunto loogu tala gelin ee lacag laga helo.

2. Gaadidka

B. Gaadiidka iyo suuq geynta mooska.
- Dhaqsaha.
T. Faa'iidooyinka mooska.
Shaqaale badan oo shaqo ka hela.
Lacag badan oo inaga soo gasha.
J. Kordhinta soo saaridda mooska.
Abuuridda iskaashitooyin.
Dhul habboon oo la helo.
Qarash loo helo.
Aqoon iyo diyaarinta qalabka wax lagu soo saaro.

3. Kaalinta muhimka ah ee hargaha iyo saamuhu kaga jiraan dhaqaalaha.

B. Sida dalka gudihiisa looga isticmaalo.
Baahida gudaha ee hargaha iyo saamaha.
Wershadeynta hargaha iyo saamaha ee dalka gudihiisa iyo alaabada laga sameeyo. Seyladaha dalka gudihiisa.
T. Siyaalaha kala geddisan ee wax loo beero.
Midho beerashada.
Xoolo beeridda.
Beera waraabinta.

4. Saylad geynta alaabta.

B. Saylad geynta alaabooyinku waxay ku wanaagsan yihiin iskaashi. Waxa habboon in aad ogtahay inta qarash ay kuugu fadhiyaan iyo wixii aad macaash uga rabtid, adiga oo tixgelinaya sicirka dawladda.

5. Gaadiidka dalkeena (faa'iidooyinka iyo waxyeelooyinkiisa).

B. Dadka
Xoolaha
Gaari dameer iwm.
Gawaadhi
Dayuurado
Biyaha.

6. Abuuridda iskaashato.

B. Fahamsiinta dadka.
Ururinta maal gelinta
Diyaarinta iyo doorashada dhulka
Doorashada waxa la beeraayo, abuurka iwm.
Ka faa'iideysiga macaawinada dawlada ee ah qalab iyo talooyin.
Raadinta aqoon yahanno wax soo saari kara.
Ka faa'iideysiga iyo wax soo saaridda xoolaha iyo xoogga iskashatada.

# AASAASKA TIKNOLOJIYADA

## FASALKA IIaad

### Habka horumarinta guriga

1. Alaabta ku habboon jikada
   - Moofo
   - Rako kariska loogu talo galay
   - Dheryo kala duduwan iyo qalabka kale ee jikada.
2. Dhismo kaydka cuntada loogu talo galay oo intii suuragal ah laga ilaaliyo cayayaanka
3. Hab wax qaboojin oo loogu talo galo jikada
4. Sida loo sameeyo shaandho biyood oo hawl yar
5. Sida ku habboon in loo isticmaalo shabaqa kaneecada ee daaqadaha, albaabada iyo sariiraha
6. Samaynta fadhiga guriga sida kuraasta
7. Samaynta qalabka fudfudud ee guriga sida miisaska, sariiraha iyo kabadhada ama armaajooyinka
8. Dhoobaynta gidaarada ama der-biyada
9. Samaynta saqaf ammaan ah
10. Hawo gelinta guryaha iyadoo la isticmaalayo albaabo iyo daaqado
11. Diyaarinta shammiitayn ama sibdhin ammaan iyo nadiif ah ee gudaha guriga iyo agagaarkiisaba.

### Xubin: Isku sakalka fud-fudud

1. Isku sakalka farsamada looxa
2. Isku sakalka farsamada birta (alxan).

## FASALKA SADDEXAAD

### Cutubka 1. Ujeeddooyinka laga leeyahay barashada Juqraafiga

- Waxtarka barashada Juqraafiga xagga beeralayda
- Waxtarka barashada Juqraafiga xagga Xoolo dhaqata
- Waxtarka barashada Juqraafiga xagga Kalluumaysatada

### Cutubka 2. Adduunka

B. Baaxadda iyo muuqaalka adduunka
- inta barriga ah iyo inta biyaha ah
- samayska dhulka sida uu u egyahay (spherical)

T. Loolka iyo dhigaha
- waqtiyeynta iyo xilliyeynta fikrad guud

J. Labada cirif
- cirifka waqooyi
- cirifka koonfureed
- kuleylayaasha
- ku dhex wareegga qorraxda dhulka badhaha iyo kulaalayaasha

X. Udub dhexaadka - waqtiyada

H. Dhaqdhaqaaqa dhulka - [illegible] iyo wareega
- habeenka iyo maalinta
- samaynta afarta xilli

### Cutubka 3. Biyayowga

B. Badaha waaweyn
- baasifik, atlaantik, hindiyo

T. Badaha yaryar
- Badda cas, badda cad

J. Faa'iidooyinka badda
- xagga isgaarsiinta
- kalluumaysiga
- Khayraadka kale ee badda - milixda iwm

X. Webiyada iyo durdurada iyo harroyinka
- webiyada waaweyn - Jubba
- Waxtarka webiyada - waraabinta, isgaarsiinta
- dh[illegible] biyaha socda- fatanidda, ciid qaad[illegible]
  ca[illegible]

Cutubka 4. Dhul lahaanshaha iyo dhowritaanka degaanka

B. Keli lahaanshaha dhulka - beerta
T. Dhibaatooyinka la xidhiidha keli lahaanshada
  - Maal gelin yar iyo muruq iyo maskax keli ah
  - Soo saarid miro yar
J. Koox lahaanshaha
  - Isku tiirsi maal, maskax iyo muruq
  - Wax soo saarid badan
  - Kor u dhigid dhaqaale
X. Diyaarinta dhulka
  - Geed qaadaka
  - Qalabka diyaarinta (geed qaadka) dhulka
  - Carro rogga
  - Abuuridda beerta
  - Baaqbaaq - ku yaraynta abuurka beerta
KH. Carro guurka
  - Waxyaabaha dhaliya carro guurka
  - Biyaha socda
  - Dabaysha
  - Raafka xoolaha
  - Jarrida dhirta
  - Daaqista iyo beeridda badan
D. Ka hortagga carro guurka
  - Biya celinta
  - Dhir abuuridda
  - Dhir gubid la'aanta
  - Dhir jarrid la'aanta

# TAARIIKH

## Casharka 1. Dhalashadii Diinta Islaamka

B. Noloshii Carabta Islaamka ka hor
- Siday u degganaayeen
- Waxyaabaha ay samayn Jireen
- Xidhiidhka ka dhaxeeyey

T. Waxyaabaha ay caabudi jireen
- Illaahyo dhagxaan ah
- Ilaahyo looxya ah

J. Waxyaabaha xun ay samayn jireen
- Dilka gabdhaha
- Dhaca

X. Diintu waxyaabaha cusub ee ku soo kordhisay noloshooda
- Ilbaxnimo cusub
- Xeerar cusub

## Casharka 2. Risaaladii Nebiga

B. Dhalashadii Nebiga
- Meesha uu ku dhashay
- Taariikhda iyo sannadka uu dhashay

T. Siduu Nebigu u soo barbaaray
- Ciddii soo barbaarisay
- Meelaha uu ku soo barbaaray

J. Hawlaha uu qaban jirey intuu yaraa iyo markuu qaangaadhay
- Xoola raac
- Ganacsi

X. Goortuu Waxyigu ku soo degay
- Inta sannuu jiray
- Meeshuu joogay
- Malagga Waxyiga ku soo dejey

KH. Siduu diinta Rabbi u faafiyey
- Waxyaabaha fiican oo dadka ku waanin jirey
- Waxyaabaha xun oo dadka ka waanin jirey
- Ka tegidii Maka iyo aadistii Madiina - Hijradii
- Siduu gaaladii iyo intii raacsaneyd ula dagaallamay
- Diintu intay gaadhay iyo dadka rumeeyey

## Casharka 3. Faafintaankii Diinta Islaamka

B. Nebigu intuu noolaa dalalka diintu ku faaftay
   - Xijaas iyo dalal kale oo carbeed
T. Ciidamadii qaybta weyn ka qaatay faafinta diinta
   - Ciidammo carbeed
   - Culumo iyo asxaabtii Nebiga
J. Dalalkun dhaqso diintu ugu faaftay
   - Dalalka gacanka carbeed
   - Waqooyi Afrika; Turkiya, Afrikada Bari
X. Siday dadku u qaateen diinta iyo siday noloshooda u saamaysay

## Casharka 4. Khulafadii Islaamka

B. Abuu Bakar
   - Sidii loogu magacaabay Khaliifka koowaad ee Muslimiinta
   - Maamulkiisu siduu ahaa iyo waxyaabuhuu qabtay
   - Diintu dalalka ay ku faaftay intuu hayey taliska
T. Cumar Binu Khadaab
   - Doorashadii
   - Taliskiisii iyo maamulkiisu siduu ahaa
   - Siduu diinta u faafiyey iyo hawluhuu qabtay
   - Geeridiisii
J. Cismaan Bin Cafaan
   - Doorashadii
   - Maamulkiisii dawladnimo
   - Dalalkauu diinta ku faafiyey
   - Maamulkiisu goortii iyo siduu u liicay - geeridiisii
X. Cali Bin Abuu Daalib
   - Doorashadiisii
   - Taliskiisii iyo waxyaabaha uu qabtay

## Casharka 5. Soo geliddii iyo ku fiditaankii Diinta Islaamka dalalka Afrika, gaar ahaanna, Soomaaliya

B. Ciidamadii carbeed ee gacanta weyn ka gaystay fidinta diinta
   - Qabashadii dalal badan
   - Ka dhaadhicintii dadka diinta
T. Diintu isbeddelka ay keentay
   - Xagga siyaasadda iyo noloshada dadka
   - Xagga dhaqanka

J. Diinta Islaamku goortey iyo siday ugu faaftay
- Dalalka Afrikada qaqooyi
- Dalalka Afrikada Galbeed
- Dalalka Afrikada Bari

X. Diinta Islamkuu goortay soo gaadhay dalka Soomaaliya
- Qarnigii iyo meelihii ay ugu soo horraysay

KH. Sababaha keenay diinta si dhakhso ah iyo si dhib yar inay ugu faafto Afrikada Bari
- Imaatinkii iyo joogidii ganacsata carbeed
- Imaatinkii culumo dadka diinta barta

## Casharka 6. Ururka Midowga Afrika

B. Goorta iyo meesha lagu asaasay
- Madaxweynayashii fikradda keenay
- Magaaladii markii ugu horraysay layskugu yimid ee lagu asaasay
- Dalalkii Afrika, amase, madaxdii iskugu yimid ee aasaasay

T. Sababaha ugu weynaa ee dhaliyey
- Isbahaysiga Afrika
- Wax wada qabsiga Afrika
- Iskaashiga Afrika

J. Ballan **qaadkii**, amase, himilooyinkii ururka
- Xoreynta Dhammaan dalalka Afrika
- Isu geynta Afrika
- Baabiinta gumaysiga
- Meel qudha ka soo wadajeedsiga

X. Xarunta iyo dalalka ka mid ah ururka
- Magaalada xarunta iyo shirka madaxweynayaasha sannadkiiba hal mar
- Dalalka Afrikaanka ee ku jira

## **Casharka** 7. Ururka Jaamacadda Carabta

B. Goorta la asaasay
- Taariikhda iyo meesha lagu asaasay
- Intii dawlado asaastay

T. Sababaha dhaliyey in la asaaso
- Isbahaysiga dawleddaha carabta
- Meel ka soo wadajeedsiga Ummadda carbeed

J. Ujeedooyinka ururka
- Isu geynta Ummadda Carabta
- La dagaalanka isticmaarka iyo sahyuuniyadda

X. Dawladah ku jira
   - Inta ay yihiin
   - Dawladda Soomaaliya markay ku biirtay

## Casharka 8. Ururka Qarmada Midoobay

B. Taariikhda iyo meesha lagu asaasay
   - dagaalkii labaad kaddib
   - Magaalada San-Faransiisko ee lagu asaasay
T. Sababihii keenay in la asaaso
   - Dagaal saddexaad siduuna u dhicin
   - Dawladaha adduunka inay isbahaystaan
J. Hawlaha iyo laamaha ay ka kobban tahay
   - Barlamaanka guud
   - Waaxda nabadgelyada - dawladaha joogta ku ah
   - Waaxda bulsho iyo dhaqaalaha - laamaha hoos yimaada
   - Waaxda ammaan gelinta - Golaha Wisaayadda
   - Maxkamadda gassoorka adduunka
   - Waaxda xoghaynta
X. Xarunta Ururka iyo inta dawlado ku jirta
   - Magaalada xarunta u ah ee Niyuu Yoork (New York)
   - 148ka dawladood ee ku jira

## Casharka 9. Isbahaysiga Gaashaanbuurta Naato iyo Waarso

B. Taariikda iyo meelaha lagu asaasay
   - Goortii la aasaasay heshiiska Naato
   - Goorta la asaasay heshiiska Waarso
T. Sababihii dhaliyey heshiisyada
   - ka badbaadida weeraro iyo dagaal
J. Axdiga iyo heshiisyada gaashaanbuur
   - Isbahaysiga xagga difaaca
   - wada dagaalan marka dawlad lagu soo duulo
X. Dawladaha ka mid ah gaashaanbuurta Naato
   - Dawladaha Yurubta galbeed
   - Dawlada Maraykanka
KH. Dawladaha ku jira heshiiska Waarso
   - Dawladaha Ruuska iyo Dawladdaha Yurubta Bari

## Casharka 10. Nabadgelyada iyo isbahaysiga dunida

B. Heerarka kala duwan ee dunidu soo martay
  - Isbeddelka maalinba maalinta ka dambayssa
  - horumarka xagga cilmiga iyo sancada

T. Nolosha dadka dunida ku nool
  - Dadka nolosha sare ku nool
  - Dadka nolosha cidhiidhiga ku nool

J. Waxyaabaha dadyowga dunida looga baahan yahay ee lagama maarmaanka ah
  - Isbahaysi iyo wax wadaqabsi
  - istaageerid iyo is xaq dhowr

X. Siyaasadda Soomaaliya
  - Mowqifka ay ka taagan tahay siyaasadda adduunka
  - Nabadgelyada iyo iskaashia ay ku baaqeyso.

# K A C A A N

## FASALKA SADDEXAAD

### XISBIGA HANTI-WADAAGA KACAANKA SOOMAALIYEED

### 1. Himilooyinka Xisboga

1. Mideynta Ummadda Soomaaliyeed
2. Barwaaqeynta iyo kor u qaadida nolosha Bulshada Soomaaliyeed
3. Hirgelinta mabaadida hawl iyo Hantiwadaaga
4. IWM.

### 2. Guddiyada Xisbiga iyo Hawshooda

1. Guddiga Siyaasadda
2. Guddiga Dhexe ee xisbiga
3. Guddiga Kormeerka

### 3. Hoggaamada iyo hoggaan ku xigeenka Xisbiga iyo hawshooda

Sida: Hoggaamada iyo Wasiirada IWM.

### Cadowga horumarka bulshada soomaliyeed (Qabyaalad iyo goboleysi)

B. Qabyaladdu waxay tahay iyo dibudhaca ay keento
   Nidaam duug ee laga tegay
   Ku teggida ummadda
   Colaad ummadda dhexdooda
T. Xumaanta qabyaaladdu leedahay
   Nabadgelyo la'aan
   Caddaalad la'aan
   Sinnaanla'aan iyo eexasho
   Horumar la'aan ummadda.
J. Qabyaalad la'aanta waxay tahay:
   Caafimaad qabka bulshada
   Iskaashiga bulshada
   Wax wada qabsiga bulshada
   Midnimada bulshada
   Horumarka iyo isku kalsoonida bulshada
X. Bulshada soomaliyeed kacaanka ka hor:
   Ku dhaqankii qabyaaladda

Colaadii iyo dilkii bulshada dhexdoodu
Ka faa'iidaysiga gumeysiga

KH. Kacaankii 21 Oktoobar iyo baabi'inta qabyaaladda
Olalihii duugista qabyaaladda
Isgoboleysiga iyo is weji garadka.

3. Sahyuuniyadda iyo Imberyaalidda Caalamiga ah

B. Sahyuuniyadda waxay tahay:
Dhaqdhaqaaqa siyaasadeed
Falsafada yuhuudu inay tahay dad Ilaah doortay oo ka fiican dadyowga kale.

T. Ujeeddooyinka sahyuuniyadda
Dhulballarsiga yuhuuda
Baabi'inta iyo duudsiinta xuquuqda ummadda Falastin

J. Sahyuunidda iyo taageridda gumeysiga
Ku firirsanaanta yuhuuda addun-weynaha
Taageerada reer galbeedka

X. Soomaliya iyo la dagaallaanka sahyuuniyadda iyo khatarta ay u tahay jiritaanka ummaddu Carabta
Baaqa dawladda soomaliyeed la wada dagallanka yuhuudda
Taageerada, af iyo addin soomaliyeed la garab taagan tahay walaalahooda carbeed.

4. Hirgelinta Hantiwadaaga Cilmiga

B. Mabda'a hantiwadaagga cilmiga ah.
Jidka keli ah ee looga bixi karodhibaatooyinka
Jidka keli ah ee loogu gaari karo horumar deg degaah

T. Nidaamka caalamiga ee hantiwadaagga cilmiga
Fasiraada dabeecadda bulshada, dhaqaalaha, siyaasada
Fasiraada dabeecadda nagu meersan
Raadinta waxyaabaha faa'iidada bani aadmiga iyo wixii la xariira noloshooda.

J. Nidaam caalami ah ee loogu dhaqmo
dalalka badan ee hantiwadaaggaku dhaqmo
dadka dunida ku nool barkooda ku dhaqma hantiwadaagga
dadyowga u dagaallamay hantiwadaagga

X. Nidaamka ka soo horjeeda hantiwadaagga
Nidaamka Hantigoosadka,
Ogolaanshaha Gumeysiga, kala sarreynta iyo isku dulnoolashada

KH. Sida Waddan kasta u hirgeliyo Hantiwadaagga,

Sida hadba uga fudud ayado oo la fiirinayo dabeecadda, dhaqanka cadooyinka, dhaqaalaha iyo heerka aqoonta markaas la joogo.

D. Soomaaliya sidii loogu hirgeliyey Hantiwadaagga Cilmiga ah, la wareegii meelihii dadka ajinabiga haystey ee halbowlayaasha dhaqaalaha ahaa,
Abuuritaanki Iskaashatooyinka,
Dhismihi Wakaaladaha madax banaan,
Dhismihi iyo sii hagaajinti Warshada badan,
Kor u soo qaadidii noolasha guud ee dad weynaha:
Qoditaankii Ceelasha, dabargoyntii cudurada, sameyska jidadka, iyo horumarinta, amase daaweynta Xoolaha.
Ku baahinta Waxbarashada dadka oo dhan.

# HORUMARINTA BULSHADA

## FASALKA 3aad

B. Sida la isugu dubaridu Ururada

- In la helo dhibaha iyo danaha quud
- In la helo dad u diyaar ah isku dubridka ururada
- Habaynta shirarka
- In la baro ururada ujeeddada iyo danta laga leeyahay in laga gaadho
- In la abuuro shucuur isku mid ah iyo ururro lagu kalsoon yahay, fahmina kara bulshada
- In la sameeyo kaalmo lacageed haddii loo baahdo.

T. Tusaale: Dhibaatooyin waliba waa in ay leeyihiin dad ka dooda

Marka aad barnaamjyo bulsho aad sameenaysid waxa aad doorataa kuwa ugu qaayaha badan uguna waxtar roon bulshadaada.

- Waa in la ogaadaa baahida
- Waa in la helaa dad u qalma dejinta iyo samaynta qorshaha mushruuca
- Waa in laga fakiro habkii lagu hirgelin lahaa mashruucaasi
- Habaynta shaqaalaha iyo qalabka mashruuca la gaadhay
- Rumaynta hirgelinta mashruuca
- In laga faa'iidaysto qalabka cusub.

# QOFKA IYO BULSHADA

## FASALKA SADDEXAAD

### 1. Nolosha Ummadda

- Hawlaha uu qofku qabto. Waa in looga waramo waxyaabaha soo socda iyo Isbedelka bulshada
- Habka av naftiisu u samaysantahay oo loga warramo.
- Xusbigu kaalinta uu kaga jiro maamulka Ummadda.
- Barnaamijka Ummada (ciribtirka aqoondarrida, caafimaad la'aanta iyo dejinta dadka reer guuraaga ah).
- Siyaasadda Ummadda (Hantiwadaaga) iyada oo lagu baahinayo, wargalisyada, raadiyaha iyo golayaasha hanuuninta.

### 2. Shaqada qofka

Waa in uu ahaadaa qof u firfircoon shaqada Ummaddiisa.
- La dagaalanka gaajada
- Dawladda oo gacan lagu siiyo maamulka iyo horumarinta bulshada.

DHAQAALAHA DALKA

FASALKA SADDEXAAD

1. B. Ganacsiga debedda ee Xoolaha, Hargaha iyo Saamaha.
   - Kaalinta ay dhaqaalaha kaga jiraan. Dalalka loo iib geeyo.
   - Siyaalaha ay Dawladdu kor ugu qaadeyso tirada iyo tayada xoolaha.
   - Isir doorinta Xoolha iyo isku talaalidda.
   - Xidhmaynta iyo ilaalinta daaqa.
   - Ka faaiideysiga Kalluunka si uu yaraado qaaliinka Xooluhu.

   T. Xoolaha noocyada ku habboon Ganacsiga Gudaha iyo ka dibadda.

| | |
|---|---|
| Geela | Lo'da |
| Idaha | riyaha |

2. Miisaaniyadda Qarameed
   1. Meelaha uu ka yimaado
      - Dhowrista iyo ka faaiideynta hantida qaraneed.
      - Baahida cashuuraha iyo nocyadooda.
      - Cashuuraha waxyaalaha faakihaysiga ah sida sigaarka.
      - Cashuurta Mushahaarooyinka.
      - Cashuuraha horumarinta.
   2. Qarash gareenta miisaaniyadda Qaraneed.
      Wasaaradaha kala gediisan.
   3. Ganacsiga Dibedda
      - Waxyaalaha aan dibedda u iib geyno.
      - Waxyaalaha aan dibedda ka soo gadanno.
      - Baahida lacagta adag.
      - Isu dheellitirka waxyaalaha aan dhoofino iyo waxyaalaha aan soo gadanno.
      - Ilaalinta iyo Dhowrista lacagta Dalka.
      - Dhibaatooyinka dibed-u-saarista lacagta Dalka.
   4. Kor u qaadidda, Kordhinta iyo daryeelidda Gaadiidka iyo Jidadka.
      - Baahida kordheyso ee uu keeney dhaqaalaha koraya.

AASAASKA TIKNOLOJIYADA

FASALKA 3aad

Xubin: Aaaladaha wax lagu qiyaaso

1. Baahida loo qabo iyo habka cabirka sida wakhtiga, dhererka, mugga, culayska iyo bedka.
2. Cabirka waqtiga: isku beddelka hal-beegyada kala duwan.
3. Cabirka dhererka: dherer cabirka dhaqaneed iyo ka casriga ah iyo ku shaqaysigooda.
4. Cabirka bedka, xidhiidhka ka dhaxeeya dhererka iyo bedka iyo ka faa'iidavsiga aaladaha fud-fudud
5. Hubinta iyo samaynta qiyaasaha culayska. Aaladaha caadiga ah ee cabirka culayska
6. Cabiraada mugga: xidhiidhka ka dhaxeeya mugga iyo culayska ee alaabta kala duduwan.

Qalabka fud-fudud iyo sida loo isticmaalo

1. Qalabka lagu isticmaalo looxa: Musmaaro, dube, miinshaar, kelbad iyo xabko kala jaad ah.
2. Faa'iidada musmaarada kuwa wareegga iyo kuwa caadiga ahba.
3. Ilaalinta iyo xanaanaynta qalabka.

Mishiinada fud-fudud

1. Isticmaalka kabaalada iyo sida loo sameeyo kuwa raaga
2. Isticmaalka khafiyadaha iyo sida loo sameeyo kuwa hawl yar
3. Ujeeddada geerarka (marshooyin) iyo isticmaalkooda.

Koronto

1. Korontada dabiiciga ah: duufaano
   soo saarka korontada ee lagu soo saaro habka fud-fudud sida rabadhka, qaraarada.
2. Sida uu baaterigu u shaqeeyo
3. Korontada loo isticmaalo iftiinka
4. Korontada lagu isticmaalo shaqooyinka kala duduwan, sida (mishhinada korontada ku shaqeeya, kulka, xoogga baateriga).
5. Badbaadada loo baahan yahay marka lagu shaqaynayo koronto.

'amarta kulaylka, biyaha iyo dabaysha

.. Dhibaatooyinka kulaylka dabiiciga ah ee waddamada ku yaala kualaalayaasha.
Sida looga faa'iidaysto kulaylka:
- Cuntada oo lagu qalajiyo
- Dharka qoyan oo lagu engejiyo
- Daaqa footosintesiskiisa

!. Soo saarka kulaylka aan daabiiciga ahayn
- Xaabo gubka
- Digada geela
- Isticmaalka gaaska
- Naafto ama baadroolka
- Dhuxusha iyo sida loo soo saaro

i. Isticmaalka dabaysha iyo biyaha
- Dabaysha oo loo isticmaalo in ay ka shaqaysiiso Janaraytarka
- Biyaha oo loo isticmaalo ka shaqaysiinta janaraytarka iyo gaadiid ahaan.

ababka Tiknikada

.. Gubitaanka: Sida dab in uu kaco loo ilaaliyo iyo faa'iidada dambaska

!. Kariska: sida alaabta loo jilciyo sida h. ibka
Adkaynta alaabta sida Ukunta.

}. Nadiifinta alaabta ee:
- Biyaha
- Saabuunta
- Alkolada.

1977